



Ka Helida laga helayo in Qofka guriga lehi uu Hagaajiyo wixii Halaaba

Getting a Landlord to Make Repairs

Kireystahu wuxuu xaq u leeyahay in uu ku noolaado deegaan fiican oo ka soo baxa sharuudaha iyo xeerarka guryaha la dego, tamarta badan aan khasaarin (energy). Qofka guriga iska leh waxaa saaran waajibaad ah in uu hubiyo in uu gurigu yahay meel ku haboon in lagu noolaado. Haddii qofka guriga aad kaga jirtaa uusan hagaajin wixii guriga ka halaaba, waxaa jira waxyaabo aad sameyn kartid si aad ugu khasabto in qofka guriga lahu uu guriga hagaajiyo.

Haddii xaalad degdeg ahi jirto, wac xafiiskaaga gargaarka sharciyada (legal aid) Xaaladaha degdeg ah waa sida koronto la'aanta, kuleyl (heat) la'aanta, shoolad la'aanta, tuubooyinka biyaha oo aan shaqeynayn iyo, biyo kulul la'aanta, ogoysiiska ah in guriga la duminayo.


Haddii xaalad degdeg ahi aysan jirin, fadlan samee kuwaan soo socda:

- Ku qor liiska waxa u baahan u la hagaajiyo warqadan war-gelinta gadaalkeeda ka dibna u dir qofka guriga iska leh. Koobi kala har. Waxaa fiican in la diro liiskan oo kale ama warqad laakiin (texts) iyo emaylku iyada waa la diri karaa. Waa in aad daabacdaa saxiixdaana shaabadna saartaa.
- Haddii ay magaaladaaddu leedahay gurye fatashe, wac. Kolka uu yimaadana tus liiska si kolkaa aadan waxba uga tagin. Waysiiso inuu kaa siiyo koobi war-bixintiisa.

Minneapolis, ka wac 311. St. Paul, ka wac (651) 266-8989. Qaybaha kale ee Gobolka waxaad wici kartaa waxa la yiraa Wicida Caawimaada Koowaad (First Call for Help) ee 211, ama 1-(800) 543-7709 si aad u ogaato in magaaladaadu leedahay fatashe guryaha fatasha.

Gurye gatashayaashu waxaa dhici karta inay helaan wax aad adigu gaftay. Haddii waxaasi ay aad u xun yihiin, waa ay dumin garaan guriga oo dhan haddii la hagaajin waayo. Haddii dhibka jiraa uusan khatar ahayn, fatashahu waxa uu siiyaa qofka guriga leh 30 cisho oo uu ku hagaajiyo.

Qofka guriga lehi kaagama uu saari karo guriga sababta ah codsiga aad codsatay in guriga lagaa hagaajiyo ama wicida aad wacatay guri fatashaha. Laakiin qofka guriga iska lehi waa isku dayi karaa in uu guriga kaa saaro haddii aad kirada u bixin waydo hagaajin la'aanta guriga. Haddii aad qayb kala hadho kiradaada qofka guriga iska lehina uu isku dayo in uu guriga kaaga saaro uun



codsiga aad codsatay in gurigaka lagaaga hagaajiyo, waxaad ka codsan kartaa in maxkamadu ay joojiyo dacwada saarida guriga “La gaana tir tiro” saaridaa, taasoo macnaheedu tahay in diiwaanada dowlada laga tir-tiro. Eeg warqada war-gelinta ee [Evictions](#).


- Hadii qofka guriga lehi uu wali diidan yahay in uu guriga hagaajiyo ka dib kolkii aad warqada qortay ama aad wacday fatashaha, kolkaa xareyso dacwo la yiraa (Rent Escrow) oo macnaheedu yahay in aad kirada u dhiibto maxkamada si aad u bilowdo ashatakaynta qofka guriga leh. Kolkaa waa inay maxkamadi ku amarto qofka guriga leh inuu guriga hagaajiyo. Waxaad kaloo u isticmaali kartaa dacwada inaad ku khasabto in qofka guriga lehi uu raaco heshiiska aad kala qorateen (lease) waa hadii la jabiyey: Dacwo waa xaraysan kartaa hadii:
 - 14 cisho ay ka soo wareegtay xilligii aad u dirtay qofka guriga leh warqada ku saabsan qodobada heshiiska (lease) guriga ee uu jabiyey qofka guriga lehi **ama**
 - Mudadii uu qabtay fatashaha guryahu la dhaafay ama qofka guryaha fatashayaa uu siiyey qofka guriga leh muddo aad u dheer oo uu ku hagaajiyo waxa halaysan.

Hadii aad tahay qof dan yar ah, waco xafiiska gargaarka sharciyada (Legal Aid). Waxaad ka heli kartaa barta: <https://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics>. Waa ay ku matali karaan ama waxay kuu gudbin karaan hay'ada kale, ama waxay ku siin karaan talo. Hadii aadan qareen heli karin adiga ayaa is-kaa u sameyn kara arrinta.

Ilaa inta aad ka xareysanaysid dacwadaada la yiraa (Rent Escrow), sii kirada qofka guriga leh markii loogu tala galay inaad siiso. Hadii aadan kirada bixin, qofka guriga iska lehi waa kaa saari karaa guriga. Waxaa laga yaabaa in wax aad isku difaacdo aad haysto waayo dhibka guriga waxa ka halaysan ah, laakiin waxaa roon inaad isticmaasho dacwada la yira (Rent Escrow) intii aad adiguna iska difaaci lehayn guriga ka saarid.

- Si aad u xareyso dacwada la yiraa (Rent Escrow), tag maxkamada degmada. Horey u sii qaado:

1. Warqada la yiraa [Rent Escrow Affidavit (foomka ku lifaaqan – waxa ay ku qoran tahay Ingiriis uun)
2. Koobiga amaradii fatashaada ama warqada qofka guriga leh loo diray iyo
3. **Dhamaan wixii kiro ah oo la rabo in la bixiyo** (cadaan ama jeeg). Uma baahnid inaad sugto ilaa iyo inta kirada waqtigeeda la gaarayo si aad u xareysato dacwada (Rent Escrow.) Laakiin waa in kirada oo **dhan loo** dhiibaa maxkamada.



Hadii aadan wada bixin kiradii oo dhan kolka aad maxkamada geyso dacwada la yiraa (Rent Escrow), qofka guriga iska lehi isna waa ku dacaweyn karaa oo wuxuu kaa saari karaa guriga.

Waxaa jira khidmado lagu xareeyo dacwadaha. Hadii aad dan yar tahay, codso in lagaa saamaxokuwaa buuxi foomka (IFP) si aad u waydiisato maxkamada dhaafidaa. Maxkamadu waxa ay haystaa foomamkaa ama adigaa mid khadlka (on-line) ka ku sameysan kara [create one online](https://www.lawhelpmn.org/forms) adigoo isticmaalaya talaabooyinka <https://www.lawhelpmn.org/forms>.



→ Riix Khidmad ka Dhaafida Maxkamada [on Court Fee Waiver (IFP)]

La imow wax cadeynaya dakhligaaga, sida jeegta dabadooda, ama cadeyn gargaar dowladeed.

- Karaaniga maxkamada ayaa kuu qaban doona kolkaa balan dacwadaada lagu dhageysto 10-14 cisho gudahood. La imow dhamaan wixii daliilo ah ee aad haysato xilliga dacwada.
 - Sawiro muujiya dhibku waxa u yahay aad ayey kuu caawin karaan. Calaamadi taariikhdana ku qor si maxkamadu u eegto.
 - Hadii fatashe la soo diray gurga fatasha, tag xafiiska fatashaha si aad uga hesho koobi **sugan** warbixinta fatashaha. Hadii fatashahu uu wax ka badan waxa ku qoran warbixinta uu ka og yahay arrinta waxaad “hor keeni” maxkamada “subpoena” si uu makhraati kuugu noqdo. Waydii karaaniga maxkamada sida arrintaa loo sameeyo.
 - Waxaad kaloo maxkamada hor keeni kartaa makhraatiyaal kale, sida daris arkay dhibaatooyinka la xiriira dhagaajin la’aanta guriga.

Mid kasta oo ka mid ah waxa halaysan tus maxkamada:

- Muddo intee le’eg ayuu dhibkani jiray.
 - Mudo intee le’eg ayuu qofka guriga lahi arrinta ogaa
 - Sidee ayey dhibkani adiga kuu saameeyey oo noloshadana uu dhibay. Faah-faahin bixi!
- Waxaad kaloo maxkamada waydiisan kartaa:
 - Iney amarto in la hagaajiyo wixii halaysan.
 - La yareeyo kirada inta laga hagaajinayo wax walba.
 - Iney dib kuugu soo celiso kirada bilihii aad guriga u baahan hagaajinta ku noolayd.
 - In wixii halaysan la hagaajiyo kharashka hagaajintaana laga jiro kirada.



Kuwani waa tusaale arimahan ku saasban:

Hada waxaa lagu jiraa bisha Juun. Waxaadna guriga soo dagtay Janaayo 1 deedii. Guriga tuubooyinkiisu waa ay xumaayeen kolkii aad soo degtay. Qoraal ahaan aad ugu sheegay qofka guriga leh markiiba arrintaa. Guriga biyaa saqafka ka soo daadanayey ilaa iyo Maarso, iyadoo qoraal ah ayaadna u sheegtay qofka guriga leh arrintaa kolkii ay bilaabantayba.

Hadii aadan bixin kiradaadii bishii juun, waxa aad bilaabi Dacwada La yiraa (Rent Escrow) adigoo u dhiibaya bisha Juun kiradeeda aan la bixin maxkamada iyadoo ay ku lifaaqan tahay warqada dhaartu (Rent Escrow affidavit) iyo koobi ah warqadihii aad dirtay bilihii Janaayo iyo Maarso. Waxaad codsan karaa in lacagta bilaha Janaayo iyo Febraayo qaar lagaa gooyo waayo tuubooyinka gurigu waa ay xumaayeen bilahaa iyo in cadad intaa ka badan lagaaga jiro kirada bilaha Maarso, Abriil, Maajo iyo Juun waayo dhibka labaad ee soo kordhay ee ah saqafka biyaha soo daynayey.

Sidaa awgeed, lacagta aad maxkamada u dhiibtay qaar ka mid ahi waa in lagu soo celiyaa waayo dhibka wixii halaysan ahaa wax lagama qaban. Sidoo kale, kirada aad mustaqbal bixinayso waa in la yareeyo ilaa iyo inta qofka guriga lehi uu sameynayo wixii hagaajin ah ee maxkamadu amartay in la sameeyo.

Waa muhiim in la ogaado in xaakimku uu leeyahay awood badan oo uu ku go'aansado inta yareynta kirada ah ee aad helayso. Xaakimadu waa ay kala duwan yihiin oo waxay siiyaan qiimeyaal kala duwan arrimaha la xiriira hagaajinta wixii halaaba, sidaa awgeed, cadadka kirada ee la yareeyaa waa ay kala duwanaa karaan iyadoo ku xiran mar walba cida qaadaysa dacwadaada iyo meesha aad ku nooshahay.

Xasuusnow: Ujeedada weyn ee laga leeyahay lacagta maxkamada loo dhiibayaa waa in la hagaajiyo waxa halaysan, ee ma aha in kiradaadu kuu soo noqoto. Sbabataa weeye sababta ay muhiimka u tahay in aad cadeyso sida dhib walbaa uu kuu saameeyey iyo sida kireysiga gurigana uu noloshaada dib ugu dhigay. Cadeynta aad cadeynayso sida mid walba oo dhibaatooyinkaas ka mid ahi uu noloshaada uga daray waxa ay ka dhaadhicin kartaa xaakimka inuu kuu xukumo yareyn kirada ah iyo waliba hagaajin la hagaajiyo wixii halaysan.

Mayey jiraan wax kale oo aan sameyn karo?

Hadii aadan xareysan dacwada la yiraa (Rent Escrow), ee kirada qaar kaaga soo noqonayo, waxaad ka dacaweyn kartaa qofka guriga leh Maxkamada Dhex-dhexaadinta (Conciliation Court) si kiradaad bixisay ay kuugu soo noqoto. Arritan waada sameyn kartaa inta aad wali guriga ku nooshahay ama kolka aad ka guurtid labadaba.



Maxkamada Dhex-dhexaadinta (Conciliation Court) kama aad codsan kartid in wax la hagaajiyo—kaliya uun waxaa ka codsana kartaa iney kuu xukunto wixii xoolo ah ee kaa dhumay. Uma baahnid qareen. Marka ay noqoto wixii cadeymo ah ee aad heli karto, waa ay ku caawin hadii aad haysato waxyaabaha ay ka midka yihiin warqadihii aad dirtay, warbixinadii fatashaadaha iyo sawiraba. Eeg warqadayada war-gelinta ee [Conciliation Court](#).

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**

TENANT'S REPAIR LIST – Request for Repairs

LIISKA WAXA U BAAHAN HAGAAJINTA EE KIREYSTAHA – Codsiga hagaajinta

Dear: (*Qaaliga ah*) _____ **Date:** (*Taariikda*) _____

Please make the following repairs within the next 14 days.

Fadlan ku hagaaji waxyaabahan halaysan ee hoose ku xusan 14 cisho gudahood.

√	PROBLEM <i>DHIBKA</i>	WHEN IT STARTED <i>GOORTA UU BILOWDAY</i>	DESCRIPTION <i>TILMAAMTA</i>
INFESTATIONS <i>U DHASHAY</i>			
	Mice <i>Dooli</i>		
	Cockroaches <i>Baran baro</i>		
	Bed bugs <i>Kutaan</i>		
	Other <i>Kuw kale</i>		
ELECTRICAL <i>KORONTADA</i>			
	No/ broken smoke detector <i>Wiishka dabka sheega oo aan shaqeynayn/halaysan</i>		
	Exposed Wiring <i>Fiilooyin muruxsan oo muuqda</i>		
	Short Circuits <i>Wareega maayada</i>		
	No cover plates on outlets <i>Korontada oo muruxsan</i>		
	Other <i>Kuwa kale</i>		
PLUMBING <i>TUUBOYINKA</i>			
	No hot water <i>Biyo kulul la'aan</i>		
	Clogged pipes/toilet <i>Tuubooyinka/musqusha xiranta</i>		
	Bad water pressure <i>Cadaadiska biyaha oo xun</i>		
	Dripping faucets <i>Qasabad biyo ka dhib-dhib cayaan</i>		
	Leaks <i>Biyo furma</i>		
	Other <i>Kuwa kale</i>		

WINDOWS DAAQADAHA		
Missing/torn screens <i>Daaqada oo jaban/maqan</i>		
Missing/torn storm windows <i>Daaqada dibada oo jaban/maqan</i>		
Broken/cracked glass <i>Muraayada oo jaban/dilaacsan</i>		
Missing/ broken locks <i>Qufulka oo jaban/maqan</i>		
Other <i>Kuwa kale</i>		
DOORS ALBAABADA		
No deadbolt locks <i>Aan quful lahayn</i>		
Broken locks <i>Qufulada oo jaban</i>		
Missing/broken door knobs <i>Daabka albaabka oo jaban/maqan</i>		
Other <i>Kuwa kale</i>		
WALLS / CEILINGS/ FLOORS ALBAABADA/ SAQAFKA/ DULKA		
Chipped / flaking paint <i>Rinji jabay/fuqay</i>		
Holes or cracks in walls <i>Godod ama dilaac darbiga ah</i>		
Leaky roof or ceiling <i>Saqaf biyo ka soo daadanayaan</i>		
Holes in carpet <i>Roog godod leh</i>		
Missing/broken tiles or linoleum <i>Mar-mar jaban/maqan</i>		
Other <i>Kuwa kale</i>		
FURNACE FUURNADA		
Not enough heat <i>Kuleyl badan aan lahayn</i>		
Gas leaks <i>Neef sii deysa</i>		
Other <i>Kuwa kale</i>		
APPLIANCES ALAABTA GURIDA		
Broken stove/oven <i>Madbaq jaban/maqan</i>		

	Broken refrigerator <i>Qaboojiye jaban</i>		
	Other <i>Kuwa kale</i>		
SECURITY / PRIVACY AMAANKA/ QARSOODIGA			
	Illegal entries by landlord <i>Si khalad ah ku soo gelid guriga</i>		
	Disturbance by other tenants <i>Shoobaraaha dadka kale ee kireystayaasha ah</i>		
	Break-ins, vandalism <i>Jabsiga, kharibaada</i>		
	Other <i>Kuwa kale</i>		
OTHER AREAS DHINACYADA KALE			
	Bare patches in yard <i>Daarada oo meelo diir-ddiran leh</i>		
	Trash from previous tenant <i>Qashin dadkii horey guriga u daganaa ay ka tageen</i>		
	Problem with garage <i>Dhibaato dhan qashinka ah</i>		
	Leaky basement <i>Guriga oo hoos biyo ka socdaan</i>		
	Pay utility bills <i>Biilka korontada</i>		
	Other <i>Kuwa kale</i>		

Tenant's Name:

Magaca Kireystaha:

Tenant's Address:

Ciwaanka Kireystaha

Tenant's Signature:

Saxiixa Kireystaha
